

Oktober 2026

Waanu ku salaamaynaa!

Dhawaan waxaa la gaarayaa waqtigii la qaadan lahaa tallaalka covid-19 iyo kii hargabka. Waxaanu rabnaa in aanu ku siinno macluumaad muhiim ah oo ku saabsan tallaalladan.

Tallaalladu waxay kaa difaacayaan cudurrada faafa, waxayna ka mid yihiin tallaabooyinka ugu wixtarka badan ee lagu ilaalinayo caafimaadka bulshada – marka laga reebo biyaha nadiifka ah. Cudurro badan oo horey ugu badnaa iswiidhan ayaa hadda si aad ah u yaraaday ama ku dhowaad aan laga helin, taas oo ay ugu wacan tahay in dad badan ay qaateen tallaalka. (Isha laga soo xigtay: Hay'adda caafimaadka dadweynaha)

Covid-19 iyo hargabku si fudud ayay u faafaan, waxayna keeni karaan qandho, qufac iyo jir-xanuun. Dadka qaarkood, cudurradani waxay ku noqon karaan kuwo halis ah. Markaad is tallaasho, waxaad yareynaysaa khatarta ah inaad si daran ugu xanuunsato cudurradan – tallaalkuna wuxuu badbaadiyaa nafaha.

Tallaallada covid-19 iyo kuwa hargabku waxay bilaabanayaan 2da noofembar

- **75 jir ama ka weyn?** Waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato tallaalka covid-19 iyo tallaalka hargabka.
- **65–74 jir?** Waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato tallaalka hargabka.
- Tallaalka covid-19 waxaa la siinayaa oo keliya haddii aad ka tirsan tahay kooxda dadka khatarta ugu jira inay si daran u xanuunsadaan.
- **Miyaad qabtaa KOL, sonkorow, cudurada wadnaha** (dhiig-karka oo keliya kuma jiro) **ama arrin kale oo khatar ah oo kordhinaysa suurtagalnimada inaad si daran u xanuunsato?** Waxaa lagugula talin karaa inaad qaadato labada tallaalka. Macluumaad dheeraad ah ka akhri 1177.se/Gavleborg.
- **Qof uur leh 12 toddobaad ka dib?** Waxaa lagugula talinayaa inaad qaadato tallaalka hargabka.
Tallaalku wuxuu ilaalinayaa adiga iyo ilmahaaga labadaba.

Sidan ayaad isku tallaali kartaa:

- Ballan ka qabso internetka adigoo isticmaalaya BankID ama aqoonsi elektaroonig ah (e-legitimation).
- Kaalay goobta tallaalka adigoo ballan qabsan (drop-in).
- Soo qaado aqoonsi ansax ah.

Marka hore, tallaalka ka qaado xarunta caafimaadka ee aad ka tirsan tahay. Miyaad u baahan tahay caawimaad ballan qabsashada? Wac xarunta caafimaadka ee aad ka tirsan tahay.

Dhammaan macluumaadka ku saabsan tallaallada (waa luqadda iswiidhishka) 1177.se/Gavleborg

Soo dhawoow!

Salaan saaxiibtinimo,
Shah Jalal, Dhakhtarka cudurrada faafa, ee Gobolka Gävleborg
Maria Nordström, isku-duwaha tallaallada, ee Gobolka Gävleborg